

# Tirakoobidda Xubnaha Maansada Soomaaliyeed\*

IDIRIS MAXAMED CALI

June 10, 2015

**ARAR:** Waraaqdani waxa ay soo bandhigaysaa hab ku salaysan xisaabta racaynta oo lagu tirakoobi karo xubnaha maansada. Habkani waxa uu aragti ahaan caddaynayaa in tirada xubnaha maansadu tahay, ugu yaraan, 7735—taas oo ay xubin waliba leedahay qaabdhismeed u goonni ah, oo ay kaga soocan tahay xubnaha kale. Waxa kale oo ay waraaqdu soo taxaysaa tusaalayaasha iyo summadaha in ka badan toddobaatan ka tirsan xubnaha kumaankunka ah ee maansada; waxa ay na si kooban u falanqaynaysaa sida tusaalayaal loogu curin karo xubnaha tirada badan ee tusaalayaasha la’.

---

**Ereydoor:** Cag, miisaan, racayn, summad, xubin

**Soogaabis:** b. bog; bb. bogog | da. daabacaad | iqk. iyo qofaf kale | m.t. ma taariikhaysna  
t.a. taas oo ah | Ti. tifaftiray

---

## 1. HORDHAC

Maansadu waa hadal ereyo hodan ah ku bilan, balaqo iyo murti ku cufan, laaxin ka riiran oo meeris-meeris u taxan, taas oo uu meeris kastaa ka kooban yahay tiro alamo (syllabi) ah oo si u habaysan. Kala duwanaanshaha meerisyada, taas oo ku xiran tirada alamada iyo siyaabaha ay alamadani u dhex degaan meerisyada, ayaa u sabab ah in ay maansadu yeelato xubno dhisme ahaan kala duwan, sida: Buraanbur, jiipto, shirib, saar, geeraar, gabay/guuroow, iwm. Geddi xubnaha maansada, mid kasta oo ka mid ah meerisyadeedu waa ay isku sar go’an yihiin. In kasta oo wax badan laga qoray maansada, tirakoobidda xubnaheeda waxba laga ma qorin—inta aan ka ogahay.<sup>1</sup> Haddaba, ujeeddada waraaqdan waa soo bandhigidda hab *aasaas ahaan* ku salaysan xisaabta racaynta (combination) oo lagu tirakoobi karo xubnaha maansada.

Waxa aan waraaqdan ku maamuusayaa Maxamed Xaashi Dhamac, oo lagu naanaysi jiray “Gaariye” (1949 – 2012). Gaariye, buunnigii suugaanta bilnaa, waxqabadkiisii cudoonaa ee uu ku daah furay miisaanka maansada, oo aan abaal weyn ugu hayo, ayaan ku maamuusayaa. Eebbe naxariistii Janno ka waraabiyo Gaariye.

## 2. GOGOLDHIG

Xubnaha maansadu waxa ay dhisme ahaan ku kala duwan yihiin habdhaca iyo dhererka ay meerisyadoodu kala yeelan karaan. Tusmaynta baraha ay alamadu meeriska ka kala galayaan

\* Haddii Eebbe idmo, xogaha waraaqdan waxa aan ku saafi doonaa buug gorfaynaya dhismaha maansada.

ayaa lagu ogaanayaa habdhaca (Guuleed, 1976, b.20), halka tirinta alamada meeriska, iyada oo la raadinayo *wadarta* alamadan—oo alanka wata shaqalka dheer (iyo dhafanaha la gedda ah ba) labo (2) ahaan loo tirinayo, alanka wata shaqalka gaaban (iyo dhafanaha la gedda ah ba) hal (1) ahaan loo tirinayo—lagu ogaanayo dhererka ay xubini yeelanayso (Dhamac, 1976a). Meerisyada gabayga iyo meerisyada geeraarku, tusaale ahaan, isku dherer ma aha. Sidaas awgeed, gabay iyo geeraar waa labo xubnood oo kala duwan. Waxaa jira xubno isku dherer ah, se ku kala duwan habdhaca, xubnahaas oo ay ka mid yihiin hees-caanoodda iyo saarku (Axmed, 2008, b.11). Tusaale ahaan, meeris saar ah waa, *Hoh iyo Boholaha Xargega*; meeris hees-caanood ahna waa, *Baranbaradu kugu xayanne*. Dhanka kale, xubin mid ah, oo ay meerisyadeedu isku dherer iyo isku habdhac yihiin, ayaa magacyo kala duwan yeelan karta, sida: Heello, hirwo, weglo, balwo. Marka la isku soo xooriyo, kala duwanaanshaha habdhaceed iyo dherereed ee xubnaha maansada ayaa keenaysa in si xisaab ku dhisan, oo kalsooni leh, loo tirakoobo xubnahan.

Gogoldhiggaan aan ku qaadaadhigayno habdhaca iyo dhererka xubnaha ka dib waxa aan u gudbaynaa waaxda saddexaad ee waraaqda, oo aan ku falanqaynayno habka lagu tirakoobi karo xubnaha maansada. Waxaa xigi doona bandhigga xubnaha tusaalayaashooda la hayo, ka dibna gabagabada.

## 2.1 Cagta iyo habdhaca

Xubin kasta oo maansada ka tirsan waxa ay leedahay cag u goonni ah, cagtaas oo muujinaysa habdhaca (t.a. qaabdhismeedka/shubaasha (scansion)) iyo dhererka xubintaas, oo ay kaga soocan tahay xubnaha kale.<sup>2</sup> Waxaa cagta laga ratibi karaa *halbeegy*o matalaya baraha ay alamadu kala galaan, kuwaas oo kala ah: (i) **V** oo u taagan barta uu galayo alanka gaaban—ee miisaankiisu yahay **1**; (ii) **W** oo uu taagan barta uu galayo alanka dheer, ee miisaankiisu noqonayo **2**, kaas oo u kala jabi kara labo alan oo gaaggaaban (sida: **VV**); (iii) **M** oo u taagan barta uu gali karo alanka mar kasta dheer—miisaankiisu na yahay **2**; (iv) **X** oo u taagan barta ay wada gali karaan labada alan ee mar kasta gaaggaaban ee isku xiga—oo leh miisaan ah **2**; iyo (v) **Y** oo u taagan (a) bar madhan (oo miisaankeedu yahay **0**), ama (b) bar uu gali karo alan leh halbeegga (iyo miisaanka) **V** ama alan leh halbeegga (iyo miisaanka) **W**. Shantan halbeeg waxa aan ku kala magcaabaynaa: (i) Guntin, (ii) xag, (iii) gaax, (iv) xigtin, iyo (v) dulsaar—labada halbeeg ee ugu horreeya waxaa u magac bixiyay: Guuleed & Riiraash, 1993/4, b.44.

Ku dhawaad 100% cagaha xubnaha maansadu waxa ay ka ratibmaan xago iyo guntin(no) isku dhafan ama xago keli ah, halka saddexda halbeeg ee kale (oo ay weheliyaan xago ama/iyo guntimo) ay ka ratibmaan cagaha xubno dhawr ah, sida: Geeraarka iyo heesta-badartumidda. Cagta heesta-badartumiddu waa: **W W X W**. Xubintan meerisyada u tusaalaha ah waa: *Muslinkii la wacoo / Minankaaga yimaad / Martiyaa la yiraa / Wa la meel mariyaa / Midigtaa la qabtaa / Wixi ay mar damcaan / Marxabbaa la yiraa*. Xigtinta (ku muujisan alamada tikha ah ee) cagtan ku jirta waxa ay noqon kartaa xag, marka loo eego meerisyadan: *Guutaa duushoo / Guureey raaceen / Reer bay gaadeen / Geel bay qaadeen / Golahay keeneen / Gool bay loogteen / Godob bay reebeen / Goxandhay beereen*. Waxa ay na cagtu isu rogaysaa: **W W W W**. Sida muuqata, haddaba, xigtintu waa xaalad goonni ah oo ay xagtu ku sugnaato.

Sidoo kale xubinta geeraarka ayaa yeelata xigtin; se wali la ma soo helin tusaalayaal muujinaya xigtintan oo xag noqotay. Geeraarka cagtiisu waa: **Y W M X M Y**, taas oo ku tusaalaysan meerisyada (aan isku xig-xigin ee kala ah): *Geeraar waa igu Ceegoo / Waa ii caanaha geela / Cusbaysiiyay jidhkoodee / Ilaahii Nebi Ciise / Cisigii la socday* (Ducaale, 2005, bb.140-142). Alamada dulsarrada ah hoosta ayay ka xarriiqan yihiin, halka alamada gaaxaha ah ay tikh yihiin. Sida muuqata, meeriska ugu dambeeya ma wato dulsaar, halka meerisyada kale oo dhami ay wataan

dulsaarro (kuwaas oo marar **W** la miisaan ah, mararka kale na **V**). Gaaxda ka horraysa xigtinta ee cagta geeraarku waxa ay noqon kartaa xag, marka alankeeda dheeri isu dhalan rogo labo alan oo gaaggaaban. Tusaale ahaan: *Saciro* iyo *Naciima* (Banti & Giannattasio, 1996, b.101). Sida xigtinta oo kale, gaaxdu waa xaalad goonni ah oo ay xagtu ku sugnaato.

Kurti xubnaha kale ee maansada waxa ay u kala baxayaan labo qaybood: Qayb cagahoodu ka ratiban yihiin xago qudha, iyo qayb cagahoodu ka ratiban yihiin xago iyo guntin(no) isku dhafan. Qaybta hore waxaa ku tirsan xubnaha kala leh cagaha: 1) **W W**, 2) **W W W**, iyo 3) **W W W W W**. Tusaalayaasha saddexdan xubnood ayaa kala ah: 1) *Mooyaha / Malablaha / Magicii?*; 2) *Dabangaalluhu / Tamayuluqaha / Ma cunaayee / Suu u hayaa?*; iyo 3) *Marku kildhi helo kilkiyow / Marka kale kuudud xumow.*<sup>3</sup> Dhanka kale, xubnaha ay cagahoodu ka ratiban yihiin xago iyo guntin(no) isku dhafan waxaa ka mid ah: 1) **W W V W W**, iyo 2) **V W V W V W V W**. Xubinta hore oo ah jiipto waxaa u tusaale ah: *Beri reerkayagu guur / Guuryoo Galbeed qabay / “Waxaraha wad!” la i yidhi / “Wadi maayo!” baan idhi / Usha dhebi la ii qaad / Iska soo wadaanwaday.* Ta’ kale oo shirib ahna waxaa u tusaale ah baydka: *Min ooy fatooro fiiq tidhaa / Ninkii fadhaaya maa fiyow?*

Faa’iido weyn ayaa ku jirta in ku dhawaad 100% xubnaha maansadu noqdaan kuwo cagahooda aan laga ratibin halbeegyada kala ah: Xigtin, gaax, iyo dulsaar. Waayo, qaaciidada racaynta, ee aan u adeegsanayno tirakoobidda xubnaha maansada, ayaa ku shaqaynaysa keliya tirada *xagaha* iyo tirada *guntimaha* ee cagta. Qaaciidadani waxa ay si fudud inoo siinaysaa inta hormo ee ay yeeshaan xubno kala habdhac ah se ka siman tirada *xagaha* iyo tirada *guntimaha*—sidaas awgeedna isku dherer ah. Inta aynaan soo bandhigin qaaciidadan, waxa aan ka faalloonaynaa sida lagu helo dhererka (ay xubini yeelato) iyada oo la adeegsanayo cagta (xubintaas).

## 2.2 Cagta iyo dhererka

Siyaabo kala duwan ayaa lagu soo saari karaa dhererka ay xubini leedahay, se sida ugu toosan ee dhererkan lagu soo saari karo waa iyada oo la raadiyo *wadarta* miisaannada ay kala leeyihiin halbeegyada cagta xubintaas.<sup>4</sup> Tusaale ahaan, jiiptada dhererkeedu waa **9**, sababtoo ah waxa ay cagta jiiptadu wadataa afar xagood (oo xag kastaa ay leedahay miisaan ah 2) iyo guntin (leh miisaan ah 1). Sidoo kale, dhererka xubinta shiribku waa **12**, maaddaama oo ay cagteedu wadatao afar xagood iyo afar guntimood. Dhererka xubinta heesta-badartumiddu waa **8** (oo cagteeda ayaa ka kooban saddex xagood iyo xigtin miisaankeedu yahay 2). Xubinta geeraarku waa ta’ keliya ee dhererkeedu yahay ugu yaraan **8**, ugu badnaanna **12** (waayo, cagta geeraarku waxa ay leedahay dulsaarro laga reebi karo, ama siyaabo kala duwan loogu dari karo). Guud ahaan, xubin walba dhererkeeda sidaas ayaa lagu soo saarayaa.

Sida aan dusha ku soo xusnay, kala duwanaanshaha ay xubnaha maansadu kala duwan yihiin waxaa sabab u ah, qayb ahaan, dhererkooda oo kala duwan. Iyada oo ay tani jirto baa waxaa dhacda in ku dhawaad xubin kasta laga dhex heli karo meerisyo kala dherer ah, sida meeriskan ku jira jiiptada “Daalallay”: *Anoo daaya mooyee* (Warsame, 1993, b.414). Dhererka meeriskani waa **10**; waxa uu na raacsan yahay xubin cagteedu tahay: **V W W V W W**. Se marka uu ku dhex jiro xubinta jiiptada waxaa meeriskan loo og yahay in uu qaadanayo kaalin farcannimo, oo aan sal ahayn, maaddaama oo uu meeriskani (dhammays ahaan) lahayn habdhaca cagta jiiptada iyo dhererkeeda ba. Sida uu na tusay Carraale, bar uu alan gaabani ku habboon yahay marka uu alan dheeri isku riixo (sida barta alanka hoosta ka xariiqan ee meeriskaas kore) ayaa waxaa soo baxa meeris farcan ah (2011, bb.34,38). Sida jirta, meeris kasta oo “farcan” ku ah xubin waxa uu sal ku yahay xubin kale, sida meeriskan ku jira tixda “Daalallay” oo kale.

In meeris farcan ku ah xubin uu sal ku yahay xubin kale waxaa (kale oo) caddayn u ah tusaalahan: *Anoo waraabkeed u xaytay / Weheey Walwaleedka ceelka / Wadaanta goortaan ku tuuray / Miyay hashii Weydo dhimatay?* Xubinta ay meerisyadani ku aroorayaan waxa ay cagteedu tahay: **V W V W V W V W V**. Xagta labaad (ee hoosta ka xarriiqan) ee cagta xubintan marka alankeeda dheer la gaabiyo waxaa soo baxaysa xubin lagu magacaabo hees-carruureed (hees-kooled), sida ku cad meerisyadan: *Anoo warabkeed u xaytay / Weheey Walwaleedka ceelka / Wadaanta gortaan ku tuuray / Miyay hashi Weydo dhimatay?* Sida muuqata, meerisyadan salka ku ah xubinta hees-carruureedda waxa ay farcan ku noqonayaan xubintaas kore—haddii aan xagta labaad la gaabin. Gundhiggu, sida uu Gaarriye qoray, waa: “Mar kasta oo aad [alan] soo kordhiso ama dhinto waxaad ku turunturoonaysaa [xubno] cusub” (1976b).

Inkasta oo aan halkan lagu faahfaahin doonin, waxaa xusid mudan in cagta xubini leedahay ay siddo xogo kasta oo ku saabsan dhismaha xubintaas, sida: Nudaha, tiraynta (eeg Cali, 2011), iwm—ka sokow in ay cagtu muujinayso habdhaca iyo dhererka xubintaas.

### 3. TIRAKOOBIS

Sida aan dusha ku soo caddaynay, xubno kala dherer ah waa ay kala duwan yihiin. Sidoo kale, xubno isku dherer ah se kala habdhac ah waa ay kala duwan yihiin. Sida jirta, xubnaha maansada dherer ahaan ayaa loo dirayn karaa, iyada oo xubnaha isku dhererka ah kob la wada dejinayo—kobtaas oo loogu magac darayo dhererka ay leeyihiin xubnaha degaya. Tusaale ahaan, jiiiftadu waxa ay degaysaa kobta sagaalaad, oo ku magcaaban Kob-9. Kobtan waxaa wada deggan xubno tiradoodu tahay sagaal, kuwaas oo ku kala geddisan habdhaca—sida aan hoosta ku arki doonno. Guud ahaan, xubnaha maansadu waxa ay kala degayaan toddobiyo-labaatan kobood (t.a. Kob-2 illaa Kob-28). Hees-kebdeedda iyo xubno kale oo kumaankun ah ayaa degaya Kob-28 (eeg Shaxan 1), halka Kob-2 ay degayso xubin qudha, taas oo tusaalaheedu yahay: *Muslin / Milmay / [Maan] / Mug leh / Mabda' / Mid ah / Mugdi / Ku mar*. Cagta xubintani waa: **W**.

Xubintan kore ma jirto xubin ka gaaban oo tusaalaheeda la curiyay; se aragti ahaan waxaa xubintan kore ka gaaban ta' cagteedu ka ratiban tahay guntin qudha, taas oo degaysa Kob-1. Dhanka kale, maaddaama oo aan la haynin tusaalayaasha xubno ka dhaadheer xubinta hees-kebdeedda, ee degaysa Kob-28, tirada kobaha ay xubnaha maansadu kala degayaan halkaas ayay ku eg tahay.<sup>5</sup> Sida jirta, kobaha ay xubnaha maansadu kala degayaan waxa ay u kala baxayaan: Kobo kisi ah (Kob-3, Kob-5, ... , Kob-27) iyo kobo dhaban ah (Kob-2, Kob-4, ... , Kob-28). Xubnaha degaya kobaha kisiga ah waxa ay cagahoodu mar kasta sidanayaan tiro guntimo ah oo kisi ah, sida: 1, 3, 5, ..., iyo xag(o). Dhanka kale, xubnaha degaya kobaha dhabanka ah waxa ay cagahoodu sidanayaan xago qudha ama tiro guntimo ah oo dhaban ah, sida: 2, 4, 6, ..., iyo xag(o).

Marka xubnaha maansada loo kala direeyo kob-kob, kob walba xubnaha degaya waxaa loo sii kala soocayaa (A) xubno deris ah, iyo (B) xubno aan deris ahayn. Xubnaha (B) waa xubno (kob wada deggan oo) aan ka sinnayn tirada xagaha iyo tirada guntimaha ee ay cagahoodu kala sitaan. Xubnaha (A) waa xubno (kob wada deggan oo) ka siman tirada xagaha iyo tirada guntimaha ee ay cagahoodu kala sitaan, balse ku kala duwan sida ay halbeegyada cagahoodu u hormaysan yihiin (Guuleed, 1976, b.40). Xubnaha (B) waxa aan tusaale ugu soo qaadan karnaa xubin cagteedu tahay, **V W W W V W W**, xubintaas oo ay isku kob yihiin shiribka, balse wadata labo guntimood (halka shiribku ka wato afar guntimood). Xubintan, oo lagu magacaabo baarcadde, tusaalaheedu waa: *Allow samayooy an lagu dhalin / Allow sumaloow an lagu qalan / Allow sidigeey an lagu dhaqan*.

Dhanka kale, xubnaha (A) waxa aan tusaale ugu soo qaadan karnaa xubinta leh cagta, **W V W W W**, taas oo ay jiiiftada isku kob yihiin, ku na tusaalaysan: *Geela gudguduudani / Waa ka*

*soo guuxaye / Gaawahaw soo culo!* Cagta xubintan iyo ta' jiiiftadu waxa ay wadaagaan tirada xagaha (oo ah 4) iyo tirada guntimaha (oo ah 1), se waxaa kala habdhac ka dhigay baraha ay halbeegyadani cagaha kaga kala jiraan oo kala duwan: Guntintu cagta jiiiftada waxa ay ka gashaa barta saddexaad, halka ay xubintan kale cagteeda ka gasho barta labaad. Sida jirta, tirada xubnaha deriska ah ee kob kasta waxaa si fudud inoo siinaysa qaaciidada racaynta ee ah,

$$C(n,k) \equiv \frac{n!}{k!(n-k)!} \quad (1)$$

taas oo  $n$  ay u taagan tahay tirada xagaha oo loo geeyay hal,  $k$  na ay u taagan tahay tirada guntimaha. Tusaale ahaan, tirada xubnaha deriska ah ee ay jiiiftadu ka mid tahay waa 5, sida ay Qaaciido (1) ina siinayso:

$$C(4+1,1) \equiv \frac{(4+1)!}{1!((4+1)-1)!} = \frac{5!}{4!} = \frac{5 \times 4!}{4!} = 5.$$

Sida muuqata, afar xubnood oo degaya Kob-9 ayay jiiiftadu shanaynaysaa, oo ay deris la tahay. Sida aan dusha ku soo xusnay, tirada xubnaha degaya Kob-9 waa sagaal. Haddaba, waxaa jira afar xubnood oo kale oo aysan jiiiftadu deris la ahayn. Tan macnaheedu waxa uu yahay: Jiiiftada iyo xubnahani ka ma sinmi karaan tirada xagaha iyo waliba tirada guntimaha. Dhanka kale, maaddaama oo afartan xubnoodi degayaan Kob-9, oo ah kob kisi ah, waxa ay cagaha xubnahani yeelanayaan tiro guntimo ah oo kisi ah. Haddii ay jiiiftada iyo afarta xubnood ee la deriska ahi qaateen midba guntin mid ah, xubnahan kale waxa ay wadanayaan midba saddex guntimood. Haddii loo fiirsado, cagta jiiiftada (ama cagta xubin kasta oo la deris ah jiiiftada) oo hal xag laga kala dhambalay, kolkaasna guntimihii xagtan ka dhashay barahooda la kala durkiyay, ayaa sababaysa in xubno hor leh oo degaya Kob-9, isla markaasna sita midba saddex guntimood, ay soo baxaan, sida ku cad tusahan:

**Tuse 1: Bandhigga xubnaha Kob-9.**

#	Cag	Qaaciido (1)	Summad	Tusaalayaal
1	V W W W W	C(4+1,1)	9:1 [1/5]	...
2	W V W W W		9:1 [3/5]	<i>Geela gudguduudani / Waa ka soo guuxaye / Gaawahaw soo culo</i>
3	W W V W W		9:1 [3/5]	<i>Beri reerkayagu guur / Guuryoo Galbeed qabay</i>
4	W W W V W		9:1 [4/5]	<i>Aabbahay baan arkaa / Halyo nirig buu wadaa</i>
5	W W W W V		9:1 [5/5]	...
6	V W V W V W	C(3+1,3)	9:3 [1/4]	<i>Ishiisa laga arkaa / Ushiisa lagu tumaa</i>
7	V W V W W V		9:3 [2/4]	<i>Ogow walaal gacalle / Nin weyn run baa deeqda</i>
8	V W W V W V		9:3 [3/4]	...
9	W V W V W V		9:3 [4/4]	<i>Shinbirayaalow heesa / Hees wanaagsan heesa</i>

Xubnaha degaya Kob-9 waxa ay u kala baxayaan, sida muuqata, labo kooxood. Sida ku cad Tuse 1, summadda xubin kasta oo ka tirsan kooxda hore waxa ay ku bilaabanaysaa 9:1, taas oo uu sagaalku u taagan yahay kobta (t.a. Kob-9), oo uu halku na u taagan yahay tirada guntimaha. Haddaba, tirada 9:1 waxa ay tilmaamaysaa derisnimada xubnahan shanta ah. Dhanka kale, labada tiro ee ku dhex jira bilaha afargeeska ah waxa ay tilmaamayaan kala duwanaanshaha

habdhaceed ee xubnahan: Tirada 5 ee aan is doorinaynin waa tirada ay Qaaciido (1) ina siinayso (t.a. tirada xubnaha deriska ah), halka tirada kordhaysa ee 1, 2,...,5 ay u taagan tahay hormada. Haddaba, sumadda 9:1 [3/5], oo ah summada jiiiftada, waxa ay tilmaamaysaa in ay jiiiftadu degayso Kob-9, wadato guntin qudha, isla markaasna tahay hormada saddexaad ee xubnaha deriska ah ee shanta ah ee 9:1.

Badashada ay guntimuhu ku bataan cagta waxa ay keeni kartaa in si fudud loo kala hormayn waayo xubno deris ah. Tusaale ahaan, xubnaha 9:3 waxa ay midi ba wadataa saddex guntimood, oo saddex barood oo aan isku xig-xigi karin kaga kala aadaya cagaha xubnahan. Hormayn *sugan* si loogu sameeyo xubnahan waa in guntimaha saddexda ah bidix la isu raaciyaa. Kolkaas waa in guntinta u midigaysa loo sii sik-sikiyaa midig, illaa ay ku xasisho barta ugu midigaysa ee cagta; ka dibna guntinta taas ka sokaysa la sikiyo, iyada oo ay guntinta ugu dambaysa la sikanayso. Sidaas ayaa guntimaha loo sii sik-sikinayaa, illaa ay ku kala beegmayaan saddexda barood (ee kala durugsan) ee ugu midigeeya. Guntimuhu waa in ay bidix uga guuraan si nidaam leh, oo ay midig u guuraan. (Sidan cagsigeeda na waa suurtagal, waa na isla natijadii oo rogan). Tusahan hoose ayaa soo bandhigaya tabtan:

**Tuse 2: Hormaynta xubnaha 9:3.**

Cag	Baraha Guntimaha	Hormada
V W V W V W	1-3-5	1
V W V W W V	1-3-6	2
V W W V W V	1-4-6	3
W V W V W V	2-4-6	4

Iyada oo la raacayo tabta Tuse 2, hormaynta xubno kasta oo deris ah waa la ogaan karaa, siiba marka la adeegsado qorshadaarka Excel ama MATLAB. Sida jirta, xubnaha guntimaha badan leh ee aan waaxda afraad ku soo bandhigayno qaarkood waxa aan hormayntooda u adeegsannay barnaamij aan ku qornay MATLAB—*isaga oo app* ahna mustaqbalka dhaw ayaan soo saari doonnaa.

### 3.1 Tirakoobka xubnaha maansada

Dawga aan ku helnay tirada xubnaha degaya Kob-9 ayaan ku helaynaa tirada xubnaha degaya kob kasta. Dawgan, kaas oo aan ku magcaabi karno, “Habka Tirakoobidda Xubnaha Maansada” ayaa waxa uu ku salaysan yahay saddexda qodob ee kala ah: (I) Diraynta xubnaha maansada oo kob kob loo direeyo, (II) kooxaynta xubnaha deriska ah ee kob kasta, iyo (III) hormaynta ay Qaaciido (1) ina siinayso ee xubnaha deriska ah. Sida aan dusha ku soo falanqaynay, xubnaha maansadu waxa ay kala degayaan toddobiyo-labaatan kobood, oo kobi ba kobta ku xigta ay dheer/dhiman tahay hal alan oo gaaban (t.a. *guntin*). Halkaas qodobka koobaad ayaa ku hirgalay.

Hirgalinta qodobka labaad waxaa u sabab ah guntimaha. Xubno kasta oo isku dherer ah, isla markaasna wata tiro guntimo ah oo is le’eg, waa isku koox; waxa ayna iska xigaan xubnaha kale ee aysan dhanka tirada guntimaha iska le’ekeen, inkasta oo ay isku dherer noqon karaan. Haddii qodobka koobaadi dir dir u kala saaray xubnaha maansada, qodobkan labadii waxa uu dir walba u sii kala saaray koox koox. Immika, iyada oo la adeegsanayo xisaabta raceynta, waxaa si fudud loo soo saari karaa tirada xubno kasta oo isku koox ah. Waxaa na taas hirgalinteeda leh qodobka saddexaad. Haddaba, qodobbadaan saddexda ah marka si nidaam ku jiro loo adeegsado waxaa la helayaa tirakoobka xubnaha maansada.

Tuse 3 ayaa sidan nidaamsan u soo bandhigaya tirakoobka xubnaha maansada Soomaaliyeed:

**Tuse 3: Tirakoobka xubnaha maansada Soomaaliyeed.**

		Tirada guntimaha											
		0	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	
Tirada kobaha	1												0
	2	1											1
	3		2										2
	4	1		1									2
	5		3										3
	6	1		3									4
	7		4		1								5
	8	1		6									7
	9		5		4								9
	10	1		10		1							12
	11		6		10								16
	12	1		15		5							21
	13		7		20		1						28
	14	1		21		15							37
	15		8		35		6						49
	16	1		28		35		1					65
	17		9		56		21						86
	18	1		36		70		7					114
	19		10		84		56		1				151
	20	1		45		126		28					200
	21		11		120		126		8				265
	22	1		55		210		84		1			351
	23		12		165		252		36				465
	24	1		66		330		210		9			616
	25		13		220		462		120		1		816
	26	1		78		495		462		45			1081
	27		14		286		792		330		10		1432
	28	1		91		715		924		165		1	1897
		Tirada xubnaha deriska ah ee koox kasta											

Marka la adeegsanayo Tuse 3, waxaa la dooranayaa kobta, debadeed tirada guntimaha, waxaa na markaas la ogaanayaa tirada xubnaha deriska ah ee loo gol leeyahay. Tusaale ahaan, Kob-26, iyo guntimo labo ah, waxaa ku dhan 78 xubnood oo deris ah, oo ah tirada ay Qaaciido (1) ina siinayso. [Marka tirooyinka ka muuqda qaybta huruudda ah ee Tuse 3 shakaal ahaan loo akhriyo waxaa soo muuqanaya saddexagalka Pascal, kaas oo xiriir weyn la leh dhismaha maansada Soomaaliyeed (eeg Cali, 2011, b.10). Saddexagalkani waxa uu u dhigan yahay: 1; 1-2-1; 1-3-3-1; 1-4-6-4-1; 1-5-10-10-5-1; ...] Iyada oo la adeegsanayo xogta Tuse 3, waxaa tirada xubnaha maansada loo soo bandhigi karaa sidan kooban:



**Shaxan 1: Tirakoobka xubnaha maansada Soomaaliyeed.**

Xubnaha midabka huruudda ah ku muujisan ee Shaxan 1 waa xubnaha *aragti ahaan* (ugu yaraan) jira ee maansada. Marka aan raadinno wadarta tirada xubnahan waxa aan helaynaa 7735. Sida keli ah ee ay xubnahani tiro ahaan ku sii badan karaan waa iyada oo ay tirada kobohu biirsanto. Dhanka kale, xubnaha aan tusaalayaashooda haysanno, ee ku muujisan midabka lafcirka ah, waxa ay tiradoodu tahay 74. Mar kasta oo la curiyo/helo tusaale hor leh waxaa kordhaysa tirada xubnahan. Sidaas awgeed, Shaxan 1 sidiisaas waligiis ma ahaanayo, oo diillimaha lafcirka ah ayaa kordhaya tiro ahaan—illaa ay la sinmayaan diillimaha huruudda ah.

### 3.2 Curinta tusaalayaal cusub

Waxaa cad in ay bilow tahay hawsha lagu goobayo tusaalayaasha xubno aad u tiro badan, maaddaama oo uu farqi weyn u dhexeeyo 7735 iyo 74. Nasiib wanaag, galshada (internetka) ayaa fududaysay helista tusaalayaal badan, oo qaarkood buugaag hore lagu qoray, qaarkoodna waayo hore cajalado lagu duubay (oo laga helayo Kaydka Soomaaliya ee Xarunta Cilmibaarista Soomaaliyeed, Università degli Studi Roma Tre). Kaydkaas wixii tusaalayaal ah ee laga soo heli karay waraaqdan ayay ku jiraan—haddii baadhis kale loogu noqdo na tusaalayaal aan waraaqdan ku jirin waa suurtagal in laga soo helo kaydkaas.

Sidoo kale, waxaa bilow ah hawsha loo galayo sidii tusaalayaal loogu samayn lahaa xubno aad iyo aad u badan. Waxaa jira *hab* tusaalayaal loogu samayn karo xubnaha aan tusaalayaasha lahayn. Habkani waxa uu muujinayaa in xubin kasta oo cagteedu dheer tahay ay ka samaysan tahay cagaha xubno yar yar oo isu tegay (Dhamac, 1976c). Tusaale ahaan, cagta gabaygu waxa ay ka samaysnaan kartaa cagaha saddexdan xubnood ee ku kala tusaalaysan: 1) *Mooyaha / Malablaha / Magicii? / Mooyaan*; 2) *Arooskeenna / Aroos khayr leh / Dushoo wiil ah / Docdoo*



*gabar ah; iyo 3) Baayooy Bullooy ii bax / Furfuroo fur weyn ii bax / Xeeriyo fandhaal buuxi.* Haddii saddex meeris oo tusaalayaashan ka mid ah la isla doon-doonto, waxaa soo baxaya meeris gabay ah: *Mooyaha arooskeenna xeer, iyo fandhaal buuxi.* Sida uu Cumar Macalin u dhigay, waxa kale oo meeris gabay ah laga samayn karaa tusaalayaasha saddex xubnood oo ay hidde ahaan carruurto ku heesto: *Tu dheh taa dheh maqaleey warlaay, aabbe Cali-geelle;* isaga oo ku daray, “Ninkan in uu gabyo ayaa ba loo sii diyaariyay” (m.t.).

Tusaale kale aan u soo qaadanno cagta, **V W V W V W V W V W V W V W V**, taas oo ku tusaalaysan: *Anoo kacaakufaaya kii i sii kadeeday maan karbaasho? / Kolkaasna koorta ceebta qoorta saw inaan u galiyo maaha?* Inta cagood ee isu tegay si ay cagtan u dhisaan waxa ay ahaan karaan ugu yaraan labo, ugu badnaanna siddeed (t.a. inta goor ee ugu badnaan cagtaas loo yaryarayn karo). Dabcan, cagaha isu tegaya mid kasta ugu yaraan waa in laga helaa hal xarafraac. Ha yeeshee, meerisyadaas kore (siiba meeriska labaad) ee tusaalaynaya xubintan u ma hoggaansamin *dhaqankan* maanso. Haddaba, meerisyo is leh oo dhaqankan u hoggaansan waa: *Anoo kacaakufaaya, kii i sii kadeeday, maan karbaasho? / Kolkaasna koorta ceebta, kurka in aan u galiyo, kaasi weeyi.* Immika, sida muuqata, cagta xubintani waxa ay ku dhisan tahay saddex cagood oo ay xubno kale ku dhisan yihiin, xubnaahas oo ku kala tusaalaysan meerisyada: 1) *Siteey la saari maayo,* 2) *Maanta maanta maanta,* iyo 3) *Awrka daalay.*

Guud ahaan, iyada oo habkan kore la raacayo, tusaalayaasha xubnaha maansada ee la hayo ayaa waxaa loo adeegsan karaa tusaalaynta xubno tiro badan. Marka hore se waa in la hayaa cagta xubinta tusaalaheeda la samaynayo. Cagtan waa la iska qori karaa, iyada oo aan dhererka 28 laga kor maraynin, ama waa la dooran karaa, iyada oo kobta, tirada guntimaha iyo hormaynta ba la og yahay. Sidan dambe ayaa qumman, waayo haddii cagta la iska qoro waxaa dhici karta in la qoro cagta xubin tusaalaheeda hore loo hayay—oo la labeeyo tusaalaheedii! Haddaba, waxa aan waaxdan afraad ee soo socota ku soo bandhigaynaa xubnaha maansada ee tusaalayaashooda la hayo.

#### 4. **BANDHIG**

Badi ahaan tusaalayaasha xubnaha waaxdan lagu soo bandhigayo waxaa laga soo *xulay* suugaan hore oo aan la aqoon ciddii samaysay; waxa ay na tusaalayaasha caynkan ihi ku qoran yihiin far toosan. Dhanka kale, tusaalayaasha ku qoran farta jifta waa tusaalayaal la yaqaanno ciddii curisay. Waxaa taas dheer, tusaale kasta (haddii hore waraaqdan loogu soo qaatay iyo haddii kale ba) qofkii/meeshii laga soo helay ayaa halkan ku xusan. Guud ahaan, xubin kasta oo tusaalaheeda la soo bandhigayo waxa ay wadataa cagteeda, magaceeda (oo haddii aan la haynin waxaa barta magaceeda lagu qori lahaa ka muuqda saddex dhibcood), iyo summaddeeda.

Si loo ilaaliyo caddoonaanta salnimo ee meerisyada tusaalayaasha ah, waxaa la doortay in ereyada qaar loo qoro sida ay tahay in loogu dhawaaqo (ee uu miisaanku ku quman yahay), tusaale ahaan: Axmad > Axmaad; muxuggu > muxuuggu; tamar > tamaar; bisinka > bisiinka; hurdo > hurdo; hal iyo > halyo; lax iyo > laxyo, iwm. Sida kale, meerisyada tusaalaynaya xubin kasta waa dhawr hal oo qudha; waxaa na qaar ka mid ah meerisyadan laga soo xulay tixo dhaadheer (gaar ahaan, xubnaha 5,7, iyo 8). Dhanka kale, tusaale kasta oo aan hal meeris ka koobnayn waxaa meerisyadiisa lagu kala qaaray astaanta, /. Tabtan waxaa loo door biday si ay waraaqdani u shushubnaato. Sidaas daraaddeed, meerisyada tusaale kasta la isku ma hoos tixin, taas oo ah sida aalaaba la yeelo.

Tuse 4 ayaa sidan kooban u soo bandhigaya xubnaha aynu tusaalayaashooda hayno:

**Tuse 4: Bandhigga tusaalayaasha xubnaha maansada.**

1	...	2:0 [1/1]	W
<i>Muslin / Milmay / [Maan] / Mug leh / Mabda' / Mid ah / Mugdi / Ku mar</i> (Ciiraale, 2013)			
2	...	3:1 [1/2]	V W
<i>Qoraa / Qabiil / Qushaah / Qurmuun / Quddee / Qodxuu / Qufaa / Qoraal / Qurxoon / Qisaas / Ku qaad</i> (Ciiraale, 2013)			
3	...	3:1 [2/2]	W V
<i>Ugubi / Odaga / Idaha / [Eegga] / Uga lis</i> (Ciiraale, 2013)			
4	hees-mooye	4:0 [1/1]	W W
<i>Mooyaha / Malablaha / Magicii? / Calaliye / Ciil-tire / Dumar-dhibe / Ragga-dhaye / Tibahana / Culus iyo / Cabban baa / La yidhaa</i> (Suldaan, 2009)			
5	...	4:2 [1/1]	V W V
<i>Gabiibo / Gadoobbo / Gambooni / Guduudshe / God dhiiggu / Galshaystay / Rah gaaban / Gulaalli / Galoobax / Bah gaatan / Gamuurme / Wallee gaf / Gasaasac / Nin gaystay / Gu' baas jir / Gunaanad</i> (Ciiraale, 2013)			
6	...	5:1 [1/3]	V W W
<i>Mataaneey / Ma seexdee / Mirtii baan / Muskiinnii / Ku meeraa / Malluuggaa / Cir maaxaan / Miciinkood / Malaystaa / Ma moogide / Muraadkay / Ma meelayn?</i> (Ciiraale, 2013)			
7	...	5:1 [2/3]	W V W
<i>Duul abaar / Daadsan baa / Fiid daruur / Loo da'shaa / Daayinkaa / Doojiyoo / Diiqalyaa / Daaddegtoo / Rays duxoo / Daacayaa / Doog baxshoo / Duunyadii / Daaqday baa / Duud sinmoo / Doobigaa / Daaf maroo / Awr dawaad / Doobba laa / Dooddiyoo / Deercad buu / Daaddahshaa</i> (Ciiraale, 2013)			
8	...	5:1 [3/3]	W W V
<i>Mooryaanku / Waa macangag / Mir dhexeeto / Muslin guure / Ku maraaya / Mindidiisa / Ku maqiiqa / Maryahooda / Ka mullaaxsha / Melaggaa gel! / Magacaa be'</i> (Ciiraale, 2013)			
9	...	6:0 [1/1]	W W W
<i>Dabangaalluhu / Tamayuluqaha / Ma cunaayee / Muxu u hayaa?</i> (Suldaan, 2009)			
10	...	6:2 [1/3]	V W V W
<i>Ka guur u guur / Wanaag u guur / Ka guur xumaan / Ku gooso taas</i>			
11	...	6:2 [2/3]	V W W V
<i>Arooskeenna / Aroos khayr leh / Ha lagu raayo / Ha lagu reero / Dushoo wiil ah / Docdoo gabar ah</i> (Suldaan, 2009)			
12	marjuuqa	6:2 [3/3]	W V W V
<i>Awarka daalay / Ee dekaamay / Iiga soo deg</i> (Riiraash, 1989)			
13	shubaal-I	7:1 [1/4]	V W W W
<i>Faruuryo cirrooy / Faruur dhabadkaa / Fulaa ka cabsada</i> (Cusmaan iqk, 1931)			
14	shubaal-II	7:1 [2/4]	W V W W
<i>Geelu geel fulay / Gaadhi maayee / Haa ka garab fulo</i> (Cusmaan iqk, 1931)			
15	hees-maqaleed	7:1 [3/4]	W W V W
<i>Sumalow darbane / Naylaha dudduuc / Oo dooxa gee / Oo damal hadh gali / Oo wada dumaal</i> (Magan, 2014)			
16	...	7:1 [4/4]	W W W V
<i>Roob baa da'aye / Rays baa uraye / Roonaadooyin / Soo rooroora / Gala golihinna / Waad garataane / Ood gaadhaane</i> (Magan, 2009)			
17	...	7:3 [1/1]	V W V W V
<i>Muxuuggu maanta / Mataano waaye / Moluukulmeedku / Muf iyo maf waaye / Aniyo Madiino / Dameerka Muunye / Allow na mooti</i> (Suldaan, 2009)			
18a	...	8:0 [1/1]	W W W W

<i>Guutaa duushoo / Guureey raaceen / Reer bay gaadeen / Geel bay qaadeen / Golahay keeneen / Gool bay loogteen / Godob bay reebeen / Goxandhay beereen (Ciiraale, 2013)</i>			
18b	heesta-badartumidda	8!	W W X W
<i>Muslinkii la wacoo / Minankaaga yimaad / Martiyaa la yiraa / Wa la meel mariyaa / Midigtaa la qabtaa / Wixi ay mar damcaan / Marxabbaa la yiraa (Hilowle, 1983, b.38)</i>			
19	geeraar	8-12!	Y W M X M Y
<i>Faraskayga Bullaale / Waa Bullaale Bariisoo / Bari baa laga keenoo / Wa la baayacayaayoo / Biyo wayga Wallaahi (Suldaan, 2014)</i>			
20	...	8:2 [1/6]	V W V W W
<i>Marroorta aayow / Maniin habrowtoo / Ma noo habrowtoo / Mege[e]l ma dhaantoo / Maftii ku dheegeey (Isaaq, 1987, b.3)</i>			
21a	...	8:2 [3/6]	V W W W V
<i>Shaydaan camalkiisa / Cuqlaha soo tebiya / Curaafkiyo beenta / Armaan cidi dhaadin (Ciise, 2014)</i>			
21b	...	8!	V W X W V
<i>Maroodi maroodi / Maroodi cadhoole / Haddii col la sheego / Cadaadda dul meere / Hashii Cosob waa tan (Suldaan, 2009)</i>			
22	...	8:2 [5/6]	W V W W V
<i>Waa nin oo waa nin / Waa nin weylo wata / Waa Xuseen-xafajo / Waa xundhuri kuustay / Xeedho ma hambeeye / Waa xabaal loo qod (Suldaan, 2014)</i>			
23	...	8:2 [6/6]	W W V W V
<i>Naa laago laago / Waa laan galoola / Oo laydhu hayso / Oon wali la diiran / Ee may la diiran? (Suldaan, 2014)</i>			
24	...	9:1 [2/5]	W V W W W
<i>Xaashiyay nayleey / Xaal gobaadeedeey / Xeedho subageedeey / Xididka loo loogyey / Naysha naysheedaay / Naysha Guuleedeey / Guullaheed dhawryeey / Guul la soo hoyatooy (Aadan, 198?, b.71)</i>			
25	jiifto	9:1 [3/5]	W W V W W
<i>Beri reerkayagu guur / Guuryoo Galbeed qabay / “Waxaraha wad!” la i yidhi / “Wadi maayo!” baan idhi / “Ma ahee wad!” la yidhi / “Ma wadaayo!” baan idhi / Usha dhebi la ii qaad / Iska soo wadaanwaday (Aadan, 198?, b.60)</i>			
26	...	9:1 [4/5]	W W W V W
<i>Aabbahay baan arkaa / Halyo nirig buu wadaa / Hooyaday baan arkaa / Laxyo nayl bay waddaa (Aadan, 198?, b.54)</i>			
27	...	9:3 [1/4]	V W V W V W
<i>Ishiisa laga arkaa / Ushiisa lagu tumaa (Kapchits, 1998, b.96)</i>			
28	...	9:3 [2/4]	V W V W W V
<i>War fiican iyo kii xun / Waxaad mar soo warinni / Ogow walaal gacalle / Nin weyn run baa deeqda</i>			
29	...	9:3 [4/4]	W V W V W V
<i>Caashaq waa halbowle / Waa hir soo kacaaya / Ruux kastoo halyeey ah / Maalinkuu haleelo / Huurdo seexan maayo / Boowe hay la yaabin / Shinbirayaalow heesa / Hees wanaagsan heesa (Cumar, m.t.)</i>			
30	...	10:0 [1/1]	W W W W W
<i>Marka wan la qalo wardiyow / Marka kale weer cad xidhow / Marka ri’ la qalo rambiyow / Marka kale raaska tirow / Marku kildhi helo kilkiyow / Marka kale kuudud xumow (Suldaan, 2014)</i>			
31	saar	10:2 [3/10]	V W W W V W
<i>Tan iyo fiid waan fadhiyay / Filkay u ma fool xumayn / Fagaaraha kama baqayn / Intaa fiirsan lahaa / Nin fiirsaday waa fariid (Giannattasio, 1998a)</i>			
32	...	10:2 [8/10]	W W V W V W
<i>Dadku waa kan yaacayee / Hadalkii yaqiin ahoow / An la yeelin baan arkaa (Hilowle, 1983, b.46)</i>			
33	hees-caanood	10:2 [9/10]	W W V W W V

Hooy baayo beesheenu / Waa beelo ceebeede / Yaan lay na baawayne / Yaan subagga lay bidine / Yaan beeshu ina xamanne / Yaan bahalad lay filine / Yaan “Soo bax” lay orane / Adna lagu billaawayne / Baayeey Bullooy ii bax / Furfuroo fur weyn ii bax / Xeeriyo fandhaal buuxi (Shube, m.t.)			
34	...	10:4 [1/1]	V W V W V W V
Eyaah waa wadaadda / Wadaani kaa dillaacday / Waraabe hoosta kaa cun (Suldaan, 2014)			
35	hees-cawseed	11:1 [3/6]	W W V W W W
Kurayow kadaaliyayow / Kurtin habari shidataayow / Waxba naga korkori mayside / Kuulaha ha naga goyneey (Magan, 2014)			
36	...	11:1 [4/6]	W W W V W W
Addoy ragga waa dhaqaalee / Go’ hadhuudhaa la qaadaa / Isha waa laga afuufaa / Dhagaxaa laga hal tuuraa / Dherigaa lagu ammuugaa / Xeedhaa lagu dam siiyaa / Subaggaa lagu dalluucaa (Suldaan, 2009)			
37	...	11:3 [1/10]	V W V W V W W
Tagoogo dhuubanaayee / Tiriig ka nuur badnaayee / Alloow tamaan badnaayee (Suldaan, 2014)			
38	hees-carruureed	11:3 [6/10]	V W W W V W V
Garduur iyo godanka Yeyle / Nugaalgodan gooddigeeda / Guddoonka ka yeeriyoowa / Garta u gabangaabsayooowa / Gadh weyni ka soo baxyoowa / Guntiga lowyaha gashoowa / Cirradu gaashaysayooowa / Gaboowo gaatiyoowa (Suldaan, 2014)			
39	baarcadde	12:2 [3/15]	V W W W V W W
Allow samayooy an lagu dhalin / Allow sumaloow an lagu qalan / Allow sarareey an lagu cunin / Allow subagoow an lagu gadan / Allow sidigeey an lagu dhaqan (Xasan & Cali, 1976, bb.20,21)			
40	guux	12:2 [8/15]	W V W W W V W
Aabbahay boqor ii ma goyn / Hooyaday kabo ii ma goyn / Harag sakaaray [soo xadeen] / [Hoodhiyeen] bay igu xidheen (Magan, 2014)			
41	...	12:2 [10/15]	W W V W V W W
<i>Hadda fooxa aan shidaynaa / Shafka yuu wax yeelayaayee / Wa shiddee shaydaan u yeedhkaas / Alla maa la daayo shirkigaas?</i>			
42	...	12:2 [12/15]	W W V W W W V
Geeleenna yaan la aroorin / Gubatooyin yaan la fariisin / Golihiiisa yaan lagu kaadshin (Ciiraale, 2013)			
43	shirib	12:4 [1/5]	V W V W V W V W
Min ooy fatooro fiiq tidhaa / Ninkii fadhaaya maa fiyow? (Suldaan, 2014)			
44	...	12:4 [3/5]	V W V W W V W V
<i>Anoo waraabkeed u xaytay / Weheey Walwaleedka ceelka / Wadaanta goortaan ku tuuray / Miyay hashii Weydo dhimatay?</i>			
45	...	12:4 [5/5]	W V W V W V W V
Naagtu naagta mayska dhawdo (Xaad, 2013)			
46	...	13:1 [3/7]	W W V W W W W
<i>Marba muus ha diirine daayeer / Soo dego durbaankaan qaadoo / Ka dam sii kol iyo labo daayeer</i>			
47	...	13:1 [5/7]	W W W W V W W
Goroyada geel baa la moodaa / Wa runtaa ee waa la moodaa / Xuunshada xoolaa la moodaa / Wa runtaa ee waa la moodaa (Aadan, 198?, b.70)			
48	...	13:1 [7/7]	W W W W W W V
<i>Dulmigiyo dub-ka-qaadista hiilo / Doobkiyo ducduceedu ku hoobtay / Dalka oo durkayoon isna haysan / Deegaan-la-dagaallanka haadso / Dar ka diiray dan guudna u heellan / Deeqow dugsigaas nagu haybtir</i>			
49	...	13:3 [9/20]	V W W W V W W V
Bisiinka ku yaalla baal xaashi / Muggoon ka bilaabin waan baaqday (Suldaan, 2014)			
50	geesaas	13:3 [15/20]	W V W W V W W V

Cali hal baa jabisayeeey hoogay / Geed higlaan saarnayeeey hoogay / Waan ka soo hoyanayeeey hoogay (Macalin, m.t.)			
51	...	13:3 [16/20]	W V W W W V W V
Geeljirow dhuguf flow dhagayso / Dhuuso haan gaallow dhagayso / Qaydku kaa gubayeeey dhagayso / Qaawanaan rooreey dhagayso / Qaalin lagu saaryeeey dhagayso (Suldaan, 2014)			
52	...	13:3 [17/20]	W W V W V W V W
Qudureey Qadiijo waa tanaa			
53	...	13:3 [19/20]	W W V W W V W V
<i>Soo daayay roob oo dareersan / Doog iyo caleen loo dalaysan / Durdur iyo xareed loo dabbaalsan (Axmed, 2010)</i>			
54	weglo	14:2 [3/21]	V W W W V W W W
Dhagdheer dhimatoo dhulkii nabadeey			
55	...	14:2 [9/21]	W V W W W V W W
Saaka Saylo-yar baan ka soo kacay / Saylo-weyn socod baan ku soo maray / Aar saloolanayaan u soo dhacay / Waar salaamu calaykum baan idhi / Waar salaam ma aqaanno buu yidhi / Qawtal baan qaadoo ku qool dhabay / Qayladii qaadaan qosol u dhacay (Suldaan, 2014)			
56	hees-doonyaad	14:2 [14/21]	W W V W W W V W
Badda taakiyee berriga u tallaab / Adna roor anu na an ku raawisnee / Alla Maydh ma tegin miyina u ma bixin / Oo marantiday lama soo ballamin / Gabadh doonnanayd darbiyada ha marin / Ki ku doonay baa dugsiyada fadhiya (Giannattasion, 1985a)			
57	hees-jillaabeed	14:2 [20/21]	W W W W V W W V
Meel dooro ka yeerin duur waaye / Hadal waayeel deeqa door waaye (Giannattasion, 1985b)			
58	...	14:4 [15/15]	W W V W V W V W V
Odayoow ma dooni doobi xoor leh? / Oo maxan ku diidi waa ba dahabe / Duuloo dhagaysta digashadooda! (Suldaan, 2014)			
59	...	15:3 [12/35]	V W W W V W W W V
<i>Wuxuu ku guroo galleyda ka buuxsho / Godkuu is lahaa gugaan uun dheefso / Xigaaliyo gacal u soo galay goor xun / Ayu u galoo-ga gooyay guf aad ah</i>			
60	...	15:3 [30/35]	W W V W W V W W V
Waa noogay naftayaay xanuunaysa / Noog aanan noogayn ha lay siiyo (Suldaan, 2014)			
61	...	15:5 [1/6]	V W V W V W V W V W
<i>Alhuumo hoos u sii ilaashataa / Aguug tidhaahda reer aleyl badhkee / Goggay ku eerataa ugaadhsadoo / Runtaa intaa sidii agoon ilmayn (Cali "Gamute," 2014)</i>			
62a	...	16:2 [7/28]	V W W W W W W W V
<i>Habeen dooshaa ama socotaa maalin / Horaa loo qaadaa dawgaad moodi</i>			
62b	...	16!	V W X W X W X W V
<i>Dhulkeenniyo dhiigga intii na dhumaysa / In layska dhacshaahi dhabeenna miyaa [na]? / Labaatan nin gaaray wax waa la yiraahe / An laab isku raacno luggooyo miyaa [na]? (Liibaan, 1952)</i>			
63	maanyo	16:2 [14/28]	W W V W W, V W W W
Fayd labo furmoodloow, lagaa furayeeey / Shansho goray nin dhuuxaa, shab-shab u orodyeeey / Hubush-hubushta daayoo, hubka i siiyeeey / Xayoy xeeradaadii, xayuubsadayeeey / Waa labo indhoodoo, ilaaq dheeroo / Waa labo lugoodoo, laxaad badaneey (Cali, 2013)			
64	...	18:2 [22/36]	W W V W W, W W V W W
<i>Xaqayaga ninkii sida, ku ma saamaxayno e / Soomaali waa mide, kala sooci mayno e (Aw Nuux, 1973, b.21)</i>			
65	buraanbur I	18:4 [29/70]	V W W W V W W V W V W
Calanka Soomaaliyeedow Cirshiga ka nuur / Cirkaad u egtahaye Rabbiyoow lagaa cabsado / Annagu kugu ceeshnay ilmahaagu kugu cayile / Allow cadowgaaga cagta meel ka hoose gali (Cali, 2014)			
66	buraanbur II	18:4 [49/70]	W V W W V W W V W V W

Guura dheerow wadaad baan u gogal dhigaa (yoo) / Guri kaluu iga galaayaan ka gaadhayaa (yee) / Baranbaraa xagatayoo boqol gu' buu dhul yiil (leey) / Bilistayeeey ii xil qari xadhigu waa go'aa (yee) (Giannattasio, 1998b)			
67	shallaad	19:3 [16/84]	V W W W V W W W V W W
Axmaad ishinkiisa Aay-aamow igaarkeed / Abbaayooy Faadumoy udugtooy adoogeed / Imaamka Jibriil Abuukar-Siddiiq ikhwaankood / Intii ashahaadahaysa dhammaan imaamkood / Axmaad nuurow usoo kale maa la uumee? (Lama-garan, m.t.)			
68	...	19:3 [57/84]	W W V W W V, W W V W W
<i>Urur noolba lagu waani, Arrafo iyo Soonqaad / Eid noolba la awaaji, odayaasha kuu talin</i> (Cali, m.t.)			
69	...	19:3 [64/84]	W W V W W, W W V W W V
<i>Dhan waxaan u qaadnaa, ama aynu dhaymoonno / Kama foga dhabtii hadda, riyo riyo dhextaal uun e</i> (Cali, 2012)			
70	salsal	20:2 [22/45]	W W V W W W, W W V W W
Rar xumaa rag kaa reebtee, raagsiinyo ceeb ma leh / Nabadgalow naq roobaadoo, lagu naaxay baad tahay (Abokor, 1986, b.22)			
71	...	20:4 [105/126]	W W V W W V W, W V W V W
<i>Oo raaxo loo seexday oon, laysku ridin rasaas</i> (Maxamed, 2008)			
72	gabay/guuroow	20:4 [106/126]	W W V W W V W, W V W W V
Iga kici kob aan geel ku dhalin, kuudud xumideeda (Suldaan, 2014)			
73	...	25:9 [1/1]	V W V W V W V W V W V W V W V
<i>Anoo kacaakufaaya kii i sii kadeeday maan karbaasho? / Kolkaasna koorta ceebta kurka inaan u galiyo kaasi weeyi</i>			
74	hees-kebeddeed	28:4 [338/715]	W V W W W, W V W W, V W W V W W W
Geedba geedka u dheer, laga garaacyeey, galool mudhay mullaaxdiiyeey			

Tusaalayaasha xubnaha, 41, 44, 46, 48, 52, 54, 59, 62a, 73, iyo 74, ee aan xigashada lahayn, qaarka farta jifta ku qaran aniga ayaa curiyay, kuwa kale na xilliyo kala duwan oo hore ayaan kala xafiday, oo ma xasuusto cidda aan ka qabtay. Sida ku cad Tuse 4, xubnaha 18, 21 iyo 62 waxa ay mid waliba watadaa tusaalayaal labo ah, oo labo cagood ku kala arooraya. Waxa ay na tusaalayaasha hore (a) ka marag kacayaan sida ay xigtintu u tahay halbeeg laga maarmi karo, maaddaama oo barteeda xag la galin karo. Tuse 4 waxaa ka muuqda tusaalayaal masaf ah (64, 68-70), oo u taxan bayd bayd (t.a. labo labo meeris, oo uu hakat u dhexeeyo). Haddaba, ma'aha in diiradda la saaro meerisyada aan masafaysnayn oo qudha si loo helo tusaalayaal hor leh.

Dhanka kale, meerisyo laaxin leh ayaa tusaalayaal u noqon kara xubno aan tusaalayaal lahayn. Waxaa taas caddayn u ah meeriska tusaalaynaya xubin 71, oo aan u qoray sida ay u tiri laashin Xaawo Jibriil Maxamed: *Oo raaxo loo seexdayoon, laysku ridin rasaas* (2008). Meeriskani waa meeris buraanbur ah, siiba buraanbur-II, haddii ereyga uu ku bilaabanayo ee laaxinka ku keenay laga riiro: *Raaxo loo seexdayoon, laysku ridin rasaas* (Alim, 2008, b.198).

Sida ku cad Tuse 4, xubno badan ayaan lahayn magacyo. Dhanka kale, xubin waliba waxa ay leedahay summad, taas oo laga ga sooci karo xubnaha kale. Haddaba, summaddu waxa ay u dhaqmaysaa sidii magac-u-yaal oo kale.

## 5. GABAGABO

Hadalka qubanaha (tiraabta) ah iyo hadalka maansada (tixda) ah waxaa ka dhexayn kara bilnaan ereyeed iyo cufnaan murtiyeed, se taxnaan waxa yeesha oo qudha hadalka maansada ah. Sidaas awgeed, hadalka qubanaha ah waxaa ka reebban in uu meeris-meeris u taxnaado, ha yeeshee oraaho ama/iyo weedho ku jira hadalka qubnaha ah ayaa qaadan kara qaabdhismeed meeriseed.

Tusaale ahaan, weedha koobaad ee tuducdani waxa ay ku bilaabanaysaa meeris buraanbur ah: *Hadalka qubanaha ah iyo hadalka maansada ah*. Sidoo kale, waxaa isla weedhaas ku jira meeris jiipto ah: *[W]axa yeesha oo qudha*. Haddaba, kumaankunka xubnood ee aan tusaalayaashooda la haynin waxaa tusaalayaal (meeris-meeris ah) looga dhex heli karaa hadalka qubanaha ah. Sida caadiga ahna, xubnahan tusaalayaal waa loo curin karaa—maaddaama oo la hayo cagahooda.

Curinta tusaale hor leh oo ay xubini yeelato, sida aan dusha ku soo falanqaynay, waxaa fududeeya habka isku kabidda cagaha (eeg bb.9,10). Cabdi Aadan Xaad (Cabdiqays) oo habkan adeegsanaya, dhadhan ahaan, waxa uu cagta jiiftada raaciyay cag ka kooban xag iyo labo guntimood, ka dibna waxa uu tiriyay meerisyadan (eeg xubin 53): *Soo daayay roob oo dareersan / Doog iyo caleen loo dalaysan / Durdur iyo xareed loo dabbaalsan* (Axmed, 2010). Sida jirta, tusaalayaal soojireen ah ayaa habkan ku dhisan, sida: *Naa laago laago dabahuwan / Waa laan galool ah dabahuwan*. Haddii ereyga soo noqnoqonaya ee ah “dabahuwan” la shiiqiyo, waxaa la dhigi karaa: *Hadda fooxa aan shidaynaa / Shafka yuu wax yeelayaayee / Wa shiddee shaydaan u yeedhkaas / Alla maa la daayo shirkigaas?* (eeg xubin 41).

Inkasta oo uu Gaarriye togay, dhab ahaantii, iyada oo loo eegayo aragtiyaha ay waraaqdani xambaarsan tahay, ma jirto xubin ama xubno ka tirsan maansada oo “dabar go’aya” ama ba dabar go’i kara, maaddaama oo la hayo cagta xubin kasta, tusaale na loo curin karo (2007). Ha yeeshee, in ay halabuurrada la qaddariyo, sida Xaaji Maxamed Axmed Liibaan oo kale, curiyaan tixo ku miisaaman xubno aan aad loo adeegsan (ama aan hore loo adeegsan) waxa ay keeni kartaa xuubiabad joogto ah iyo xiiso hor leh oo ay maansada Soomaaliyeedi yeelato. Waxaa na laga yaabaa in ay halkaas ku gaasiraan meerisyada isu eg-eg ee soo noq-noqda ee ay halabuurro kala duwan xilliyo kala duwan kala curiyeen—iyaga oo aan iska war haynin—markii ay xubno si aad ah loo adeegsaday (sida jiiftada oo kale) farriimahooda ku soo wada gudbiyeen.

## MAHADNAQ

Waxa aan mahad kal iyo laab ah u celinayaa: 1) Hawlwadeennada iyo madaxda Kaydka Soomaaliya (Archivio Somalia), kaydkaas oo aan ka helay buugaag, xaanshiyo iyo cajalado ay waraaqdani ku naaxday; iyo 2) hawlwadeennada iyo madaxda The Digital Somali Library. Banti, Mansuur, Johnson, Giannattasio iyo buunniyada kale ee labadaas maktabadood ugu deeqay xogaha ku saabsan maansada baa sidoo kale aad iyo aad u mahadsan.

Maxamed Aadan Ciiraale, sida uu ii dhiirrigaliyay iyo sida wacan ee uu iila qaadaadhigay xogo badan oo ay waraaqdani gudbinayso, ayaan gallad ugu hayaa. Taageero, talooyin iyo toosinba mudanayaasha aan ka helay ee kala ah, Macalin Siciid Saalax Axmed, Ibraahim Maxamed-Deeq Ciise, Ciise Kaamil iyo Abwaan Maxamed Cismaan, ayaan abaal weyn u hayaa. Sidoo kale waxa aan abaal weyn u hayaa Siciid Cabdillaahi Cabdi, oo aan ereybixinno badan ka kororsaday, sida: Qorshadaar (qorshe daar) oo ka dhigan, *software*.

Ugu dambayntii, waxa aan duco iyo mahad isugu darayaa Hooyaday iyo Ayeyday oo aan ka qoray tusaalayaasha xubno badan.

## QORAHA

1989kii ayuu Idiris Maxamed Cali ku dhashay Xamar, waxa uu na ku soo barbaaray Jigjiga. Waxa uu 2013kii Bachelor of Science ku qaatay Injineeriyada Mekaanikeed, UMass Lowell. Waxa uu deggan yahay Boston, MA. Waxaa laga la xiriiri karaa, [idiris.m.cali@gmail.com](mailto:idiris.m.cali@gmail.com) ama [www.facebook.com/idiris.m.cali](https://www.facebook.com/idiris.m.cali).



## RAADRAAC

- Aadan, A. (1987). *Suugaanta Dhallaanka*. Xamar. Laga soo bixiyay <http://purl.dlib.indiana.edu/iudl/general/pageturner/VAA3471>
- Abokor, A. C. (1986). *Suugaanta Geela*. Uppsala: Nordiska Afrikainstitutet. Laga soo bixiyay <http://urn.kb.se/resolve?urn=urn:nbn:se:nai:diya-633>
- Alim, F. A. (2008). *Saa Waxay Tiri: Maansadii iyo Waayihii Xaawa Jibriil*. Kansas City: TCS. Laga soo bixiyay <http://dspace-roma3.caspur.it/handle/2307/3493>
- Andrzejewski, B. (1982). Alliteration and Scansion in Somali Oral Poetry and Their Cultural Correlates. *Journal of Anthropological Society of Oxford*, 13(1), 68-83. Laga soo bixiyay <http://hdl.handle.net/2307/2150>
- Axmed (Hawd), I. Y. (2008). Dhuuxidda Miisaanka Maansada. Redsea-Online. Laga soo bixiyay [http://www.redsea-online.com/suugaan/miisaanka/Dhuuxidda\\_miisaanka-Ibraahin\\_Yuusuf\\_Axmed.pdf](http://www.redsea-online.com/suugaan/miisaanka/Dhuuxidda_miisaanka-Ibraahin_Yuusuf_Axmed.pdf)
- Axmed (Gadhweyne), R. C. (2010). Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: Dhigaalka Carraale. *Wayeel*. Laga soo bixiyay <http://wayeel.blogspot.com/2010/10/miisaanka-maansada-soomaaliyeed.html>
- Hilowle (Kaddare), X. A. (1983). *Wausuge iyo Warasame: Socdaalkii 30ka Maalmood*. Xamar: Akadeemiyada Cilmiga iyo Fanka. Laga soo bixiyay <http://hdl.handle.net/2307/853>
- Axmed, A. X. (1983). Maanso Structure and Content: An Application of Guuleed's Maanso Scansion System to the Meaning of "Dardaaran." Ku T. Labahn (Ti.), *Proceedings of the Second International Congress of Somali Studies*. Germany: Helmut Buske Verlag. Laga soo bixiyay <http://hdl.handle.net/2307/2863>
- Aw Nuux, C. (1973). *Gabayadii Xaaji Aadan "Afqallooc," Qaybta 2d*. Xamar. Laga soo bixiyay <http://hdl.handle.net/2307/2560>
- Banti, G., & Giannattasio, F. (1996). Music and Metre in Somali Poetry. Ku R. J. Hayward & I.M. Lewis (Ti.), *Voice and Power: The Culture of Language in North-East Africa* (bb.83-127). London: Routledge.
- Cali (Idaajaa), A. F. (2014). Barnaamijka Hiddaha iyo Dhaqanka, #217. *Codka Maraykanka*. Laga soo bixiyay, <http://www.voasomali.com/archive/culture-art/latest/3069/3073.html?id=1944581>.
- (2013). Barnaamijka Hiddaha iyo Dhaqanka, #117. *Codka Maraykanka*. Laga soo bixiyay, <http://www.voasomali.com/archive/dhaqanka-iyo-hiddaha/2/2608/3073.html?id=1743031>
- (m.t.). Alif-ka-ya': Xaaji Cali Cabdiraxmaan. Laga soo bixiyay <http://www.youtube.com/watch?v=zc6p4Z66hWA>
- Cali (Gamute), F. A. (2014). Inaabsi: Shirib. *WardheerNews*. Laga soo bixiyay <http://www.wardheernews.com/inaabsi-shirib/>
- Cali, I. M. (2012). Riyo Riyo Dhex Taal. *Heeshi*. Laga soo bixiyay <https://heeshi.wordpress.com/2012/07/07/riyo-riyo-dhextaal/>
- (2011). Tiraynta Maansada. *Heeshi*. Laga soo bixiyay <http://heeshi.wordpress.com/2011/10/21/tiraynta-maansada/>
- Ciiraale, M. A. (2013). Dhambaallo danabeed oo aan Maxamed A. Ciiraale is weydaarsannay.
- Ciise, I. M. (2014). Waraysi aan la yeeshay Ibraahim Maxamed-Deeq Ciise. Boston. Tusaalaha xubin 21a waxa aan ka soo qaatay bogga Ibraahim ee Facebook, Ogost 31, 2014.
- Ciise, J. C. (2005). *Diiwaanka Gabayadii Sayid Maxamad Cabdille Xasan* (da.2d). Jabuuti: CERD.
- Cumar (Magool), X. K. (m.t.). Shimbirayahow Heesa. Laga soo bixiyay [http://youtu.be/\\_P0HQNDchkc](http://youtu.be/_P0HQNDchkc)
- Cusmaan, M., Xoosh, R., & Ibraahin, K. (1931). Hees Geel. Laga soo bixiyay


- <http://youtu.be/pyOhe1uTMGQ>  
 Dhamac (Gaarriye), M. X. (2007). Hagarlaawe. Laga soo bixiyay  
<http://youtu.be/xiD7Z66JtoU>
- (1976a). Miisaanka Maansada. *Xiddigta Oktoobar*. Laga soo bixiyay  
<http://warside.badso.org/miisaanka-maansada-q-1>
- (1976b). Miisaanka Maansada. *Xiddigta Oktoobar*. Laga soo bixiyay  
<http://warside.badso.org/miisaanka-maansada-q-2>
- (1976c). Miisaanka Maansada. *Xiddigta Oktoobar*. Laga soo bixiyay  
<http://warside.badso.org/miisaanka-maansada-q-3>
- Ducaale (Boobe), C. Y. (2006). *Diiwaanka Maansada Cabdillahi Suldaan Maxamed (Timacadde)* (da.2d). Addis Ababa: Flamingo Printing Press.
- Giannattasio, F (1998a). Hoobala, hoobaalayee hee. Laga soo bixiyay  
<http://hdl.handle.net/2307/1814>
- (1998b). Naa waa goor gaaban gabbal dhacay na wuu jiraayo. Laga soo bixiyay  
<http://hdl.handle.net/2307/1813>
- (1985a). Alla hobaalayeeey hobaalayeeey hobaa (Xaaji “Baalbaal”). Laga soo bixiyay  
<http://hdl.handle.net/2307/1727>
- (1985b). Meel Dooro ka Yeertay Duur Waaye. Laga soo bixiyay  
<http://hdl.handle.net/2307/1731>
- Guuleed (Carraale), C. D. (2011). *Daah Furka Miisaanka Maansada Soomaaliyeed* (da.2d). Stockholm: Författares Bokmaskin.
- (1976). *Gorfaynta Gabayga*. Marka. Laga soo bixiyay  
[http://wardheernews.com/Books/Carraale/Gorfaynta\\_Gabayga.pdf](http://wardheernews.com/Books/Carraale/Gorfaynta_Gabayga.pdf)
- Guuleed, C. M. & Riiraash, M. C. (1993/4). Habka Dhismaha Maansada Soomaaliyeed. *Hal-Abuur*, 1(2&3), 43-46. Laga soo bixiyay  
<http://hdl.handle.net/2307/2952>
- Isaaq, E. M. (1987). *Tusoow ii Tilmaan*. Muqdisho. Laga soo bixiyay  
<http://hdl.handle.net/2307/2129>
- Johnson, J. W. (1979). The Somali Prosodic System. *Horn of Africa Journal*, 2(3), 46-54. Laga soo bixiyay  
<http://hdl.handle.net/2307/2762>
- Kapchits, G. (1998). *Qaamuuska Maahmaahyada Soomaaliyeed*. Moscow: Vostochnaya Literatura Publishers. Laga soo bixiyay  
<http://hdl.handle.net/2307/2164>
- Lama-garan (m.t.). Abaa Mawliidka Farxad Waaye. Laga soo bixiyay,  
<http://youtu.be/x5RWgVBjyLo>
- Liibaan (Axyaawadanii), M. A. (1952). Qasiido: Urur. Laga soo bixiyay  
<http://axyawadanii.blogspot.com/>
- Macalin, C. (m.t.). Suugaanta Carruurta. RTD. Laga soo bixiyay  
[http://youtu.be/cc\\_0HYaPw1o](http://youtu.be/cc_0HYaPw1o)
- Magan, X. A. (2014, 2009). Waraysiyo aan la yeeshay ayeyday, Xalwo Aw-Aadan Magan. Boston.
- Mansuur, C. C. (1977). *Astaamaha Guud ee Maansada Soomaaliyeed*. Xamar. Laga soo bixiyay  
<http://hdl.handle.net/2307/2138>
- Maxamed, X. J. (2008). Riyo. Bartamaha. Laga soo bixiyay  
<http://youtu.be/jT1xvGI5UBE>
- Orwin, M., & Riiraash, M. C. (1997). An Approach to Relationships between Somali Metre Types. *African Languages and Cultures*, 10(1), 83-100. Laga soo bixiyay  
<http://www.jstor.org/stable/1771816>
- Riiraash, M. C. (1989). Somali Poetry: The Case of the Miniature Genres. *Ufahamu: A Journal of African Studies*, 17(2), 16-22. Laga soo bixiyay

- <http://escholarship.org/uc/item/5071c0j4>  
Shube, C. C. (m.t.). Barnaamijka Tixmaal: Cabdilqaadir Cabdi Shube. RTD. Laga soo bixiyay,  
<http://youtu.be/U5mD0ImI1oE>
- Suldaan, L. Y. (2014, 2009). Waraysiyo aan la yeeshay hooyaday, Luul Yuusuf Suldaan. Boston.
- Xaad, C. K. (2013). Waraysi aan la yeeshay laashin Ciise Kaamil Xaad. Boston.
- Xasan, D. F., & Cali (Idaajaa), A. F. (1976). Catir Caana ku Nuuge. *Suugaanta Carruurta*, (b.20). Xamar.  
Laga soo bixiyay  
<http://hdl.handle.net/2307/2676>
- Warsame (Hadraawi), M. I. (1993). *Hal-Karaan: Maansadii Maxamed Ibraahim Warsama (Hadraawi), 1970-1990*. Oslo: Den Norske Somaliakomiteen. Laga soo bixiyay  
<http://hdl.handle.net/2307/2701>

## CAGDHIG

1 Qoraallada lagu lafaguray dhismaha maansada waxaa ka mid ah, oo laga xusi karaa: Gaarriye (1976a), Carraale (1976), Mansuur (1977), Johnson (1979), Andrzejewski (1982), Axmed (1983), Riiraash (1989), Banti & Giannattasio (1996), iyo Orwin & Riiraash (1997).

2 Sida ereybixinta “meeris” oo kale, ereybixinta “cag” waxa ay la xiriirtaa farshaxanka masafta, haanta, iwm. “Cagtu waa salka yare godan amma sallaxan, ee qarka hoose (sati; barkinta amma badhida, waliba na agabka inta badani yeeshaan, sida: hadhuubka, xeerada, i.w.m.) iyo qarka sare (mugga, gunta) ee weelka kala qaybisa,” badhtankeedu na uu unuggu yahay—eeg Shaxan A (Cali, 2013, b.4). Ereybixintani wax xiriir ah lama laha halbeegga loo yaqaanno, “*foot*,” ee ka tirsan miisaannada maansada Ingiriiska, Giriigga, iwm.



**Shaxan A: Ereybixinta cagta (Cali, 2011, b.4).**

3 Haddii ay cagta ku bataan xago isku xig-xiga daruuri ma aha in kurti xagahani wada yeeshaan alamo dhaadheer, sida ku cad tusaalaha xubinta saddexaad ee ka hadlaysa qorqodaha. Xubnaha caynkan ah, baraha ay xagahoodu kala leeyihiin waxaa si fudud loo aqoonsan karaa marka la adeegsado (a) tusaalayaasha meerisyo ay ku badan yihiin alamada dhaadheer, ama (b) tusaalayaasha meerisyo ay alamada dhaadheeri baro kala duwan cagta kaga kala jiraan (t.a. sida tusaalaha xubinta dabangaallaha ka hadlaysa oo kale).

Xubinta cagteedu tahay **W W W W W** waxa kale oo u tusaale ah: *Xayiraad wax la dul dhigoo / Awal laga xish-xishoon jiray / Waad ku ba xarragootaan*. Meerisyadan ay ku badan yihiin shaqallada dhaadheeri waxa ay isku habdhac yihiin kuwan: *Marka ri' la qalo rambiyow / Marka kale raaska tirow / Marku kildhi helo kilkiyow / Marka kale kuudud xumow*.

4 Siyaabaha kale ee lagu soo saari karo dhererka xubin maanso ah waxaa falanqeyay Gaarriye (1976a), iyo Mansuur (1977).

5 Waxaa jiri kara, inkasta oo aan loo baahnayn, xubno ka dhaadheer xubinta hees-kebedeedda. Tusaale ahaan, haddii xubnaha dhaadheer, sida gabayga oo kale, meerisyadooda la masafeeyo (eeg b.14), oo bayd kasta cag loo rogo waxaa soo baxaya xubno ka dhaadheer xubinta hees-kebedeedda. Tirada xubnaha maansadu na aad ayay u sii badanaysaa. Taasi se waxa ay suurtagal noqonaysaa marka dib u eegis lagu sameeyo dhismaha meeriska.